



Noofambar 24, 2020

Ku socota: Dadka qaba naafanimada maskaxda ama korriinka, qoysaskooda iyo asxaabtooda

Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka  
Ujeedada: Ammaanka Fasaxa

Thanksgiving-ku waa waqtiga sanadka ee aan sida caadiga ah jecel nahay in aad waqti la qaadano qoyska iyo dadka la isku dhow yahay. Si kastaba ha ahaatee, sanadkani iyada oo uu sabab u yahay cudurka baahsan ee COVID-19, fasaxyadu waa inay – noqdaan kuwo sidii hore ka duwan.

Waan ogahay in ay aad u adag tahay in laga maqnaado qoyskaaga iyo dadka la isku dhow yahay inta lagu jiro fasaxyada, laakiin waxaan codsanayaa in ka hor inta aadan qaraabadaada ama saaxiibkaaga qaba naafanimada maskaxda ama korriinka u qaadin meel la iskugu imaanayo oo ka baxsan gurigiisa, fadlan tixgelinta sii halista sare ee soo wajahaysa dadka qaba I/DD.

Xogtani waa mid walwal leh oo ay adag tahay in la akhriyo. Maqaal dhawaan lagu qoray daabacaada wararka ee [Disability Scoop](#) ayaa faahfaahin ka bixiyay in dadka qaba I/DD ay wax ka badan saddex jeer u badan tahay in ay u dhintaan COVID-19 marka loo eego dadka kale. Iyada oo dadka qaba Cudurka Lagu Dhasho ay soo wajahdo [dhimasho sareysa oo 10-jeer ka badan intii hore](#) oo ka timaada COVID-19.

Marka la joogo Xafiiska Adeegyada Naafanimada Korriinka, waxaanu sameynaynaa wax kasta oo suurtagal ah si aanu dadka qaba I/DD uga dhigto kuwo badbaado iyo caafimaad ku sugan inta lagu jiro cudurka baahsan. Waxaanu kaa codsaneynaa in aad sidaasi oo kale sameyso oo isku daydo ka fikirka siyaabo hal-abuur leh oo loola xiriirayo dadka la isku dhow yahay inta lagu jiro fasaxyada iyada oo aan xubin ka tirsan qoyskaaga, ama dadka ay guriga wadaagaan, ama shaqaalaha daryeelka bixiya la galinaynin halis. Fikradaha qaarkood ee madadaalada leh waxaa ka mid ah sameynta cunto diyaarinta oo lagu wada sheekaysanayo dhanka fiidiyowga, booqdashada meelaha bannaanka ku yaala iyada oo la xiran yahay maaskaro ama xirmada daryeelka lagu dhaafayo guriga dadka aad isku dhow dihiin. Xarumaha la Dagaalanka iyo

ka Hortagga Cudurka ayaa haysa waxyaabo kale oo la kala dooranayo iyo tilmaamaha dhanka badbaadada: <https://www.cdc.gov/coronavirus/2019-ncov/daily-life-coping/holidays/thanksgiving.html>

Haddii aad doorato in aad qof la isku dhow yahay oo qaba I/DD u qaado gurigaaga ama meelo kale oo la iskugu yimaado, daryeel bixiyayaasha ayaa codsan doona in la qaado tallaabooyin si ay gacan uga geystaan ka dhigista qof kasta oo guriga jooga mid badbaado qaba, sida xaddidaada xiriir ka dhexeeya dadka iyo xubnaha kale ee ka tirsan guriga in muddo ah, cuntada oo waqti kala gooni ah la cuno iyo in si dhow loola socdo astaamaha jirada.

Waxaan rajeynaynaa in aanu dhammaanteen mar uun ku soo laaban karno isku imaanshaha qoyska inta ay socdaan fasaxyadu kaasi oo ah hab aanu naqaanay in loo dabaaldego. Ilaa hadda, waxaan codsanaynaa in aad sameyso wax kasta oo suurtagal ah si loo ilaaliyo caafimaadka iyo badbaadada dadka qaba naafanimada maskaxda ama korriinka, iyo daryeel bixiyayaasha taageera iyaga, ee ku jira safka hore marka la qorsheynayo dabaaldegyada fasaxaaga.

Si Daacadnimo leh,



Lilia Teninty  
Agaasimaha  
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

*Farriintii Agaasimihii hore ayaa laga heli karaa*  
<http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

*Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.*

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waa aqbalnaa wicitaanada gudbinta oo dhan ama waxaad wici kartaa 711.